


**\$25 =**  
**Summer-koo idil**  
**oo bilaa cadad**  
**lagugu qaado!**



## **Ku hel qiimihii aad ku raaci laheyd summer-koo idil tareenada iyo basaska adigoo isticmaalaya ogolaanshaha ardeyda!**

Ardey Kastoo iskuulkan dhigta waxa uu raaci karaa basaska iyo tareenada iyadoon xadadheyn inta jeeruu raaci karo marka uu iska bixiyo \$ 3.00. Saacadaha aad raaci kartid waxay u dhaxeyaan 5 a.m subaxnimo ilaa 10 p.m fiidnimo laga gaaro, maalmuhuna waa todobada cishaba. ogolaanshaha ardeyda waxay soconaysaa oy sharciyeysantahay laga bilaabo bisha june kowdeeda ilaa bisha september shanteeda.

## **Sideen ku heli karaa ogolaanshaha ardeyda?**

Markey tarikhdu tahay 5/17/2017, booqo [metrotransit.org/summer-pass](http://metrotransit.org/summer-pass) si aad macluumaad dheeri ah u hesho, isla cinwaanka kor kuxusan waadka goosan kartaa ogolaanshaha ardeyda adigoo isticmaalaya kaadhkaaga. waxa kaliyeed u baahantahay waa magaca iskuulka aad dhigato iyo iskuul ID number.

Hadii aad dooneyso inaad kaash ku iibsato ogolaanshaha ardeyda, waxad kaga iibsan kartaa adigoo booqanaya rugta Metro Transit ee ah Metro transit Service Center. waxaad kala xiriiri kartaa 612-373-3333 waxaa kaloo rugaha ay leehiyiin ka heli kartaa adigoo booqanaya [metrotransit.org/service-centers](http://metrotransit.org/service-centers)

Wixii Su'aala waxaa kaa caawin kara ruux ku taqasusay arimahanoo kale. fadlan ka wac talefonka ah 612-373-3333

Hadii aad dooneysid inaad aado meelo dhaadheer sida socdaal aad ku tageysid Northstar, waxaad uun u baahantahay inaad kordiso lacagta kaadhkaaga kuugu jirto.

## **Cuno bilaash ah ayaa jirta summer-kan**

Ma ogtahay iney jiraan xarumo laga bixiyo cuno bilaash ah bulshada aad ku dhex nooshahay. Cunadan waxaa la siiyaa ruux walboo da'diisu ka yartahay 18, waxeyna soconaysaa xiliga summer-koo idil. intaa waxaa kuusii dheer adigoo isticmaali kara ogolaansha ardeyga tagista meeshan cunada laga bixiyo.

Si aad u hesho cunada bilaashka ah xiliga summer-ka:

**TEXT** 'Food' to 877-877

**CALL** 1-866-3-hungry (486479)

**VISIT** [2harvest.org/mealsforsummer](http://2harvest.org/mealsforsummer)

